[Spørsmål og svar knyttet til åpning av barnehager] Somali

Su’aalo iyo jawaabo la xiriira furitaanka xannaanooyinka carruurta

Carruur badan ayaa dabcan ku faraxsan in la furo xannaanada carruurta iyo inay dib ula kulmaan saaxiibadood. Sidaas oo kale kalsooni uma wada qabaan dhammaan waalidiinta iyo shaqaalaha xannaanooyinka carruurtu.

Xannaanooyinka Trondheim waxaa la furayaa 20-ka abriil. Degmada Trondheim waxay waalidiinta iyo mas’uuliyiinta ku soo dhowaynaysaa inay soo diraan su’aalo haddii ay jiraan wax mugdi uga jira. Dad aad u badan ayaa nala soo xiriiray, waxaana jimcihii si toos ah looga baahiyey kanaalka telifishanka degmada jawaabihii in badan oo su’aalahaas ka mid ah.

Warkaas oo la duubay waxaad ka arki kartaa halkan.
https://trondheim.kommune.no/archive/481

Guddidii su’aalaha ka jawaabasay waxaa ka mid ahaa Camilla Trud Nereid, agaasimaha waxbarashada iyo barbaarinta, Ella Ingdal, hoggaamiyaha degmada ee xannaanooyinka carruurta, Betty Johanne Pettersen, dhakhtarka guud ee degmada, iyo Gunn Kristin Hansvold, maamulaha xannaanada carruurta ee Øya.

Waxaanu maqaalkan ku soo qaadanaynaa qayb ka mid ah su’aalihii muhimka ahaa. Waxaa kaloo maqaalkan loo turjumayaa af ingiriisi, boolish, soomaali, faarsi, tigrinya, faransiis, isbaanish iyo kiswaaxili. Qoraaladaa la turjumay waxaa la helayaa laga bilaabo jimcaha.

- Maxad ula jeeddaan inay xannaanada carruurtu ammaan u tahay carruurtayda?
Dhakhtarka guud ee degmada Betty Pettersen: Marka la barbardhigo dadka waaweyn, tiro yar oo carruur ah ayaa caabuqa laga helay norwey iyo dunida inteeda kaleba. Tusaale ahaan Iislaan iyo Singabuur waxaa dadkii laga baaray caabuqa laga helay tiro aad u yar oo carruur ah. Taas waxay ina tusaysaa in carruurtu marka loo eego dadka waaweyn ilaa xad ay yartahay inay qaadaan caabuqa ama cid sii qaadsiiyaan. Calaamado sahlan ayaa iyaga laga arkaa cudurkuna si baahsan uguma dillaaco. Taas awgeed waxay anaga nala tahay inay yartahay inay qaadaan. Waxaa muhim ah in loo daymo yeesho in dalalka ay xannaanooyinka caaruurta iyo dugsiyadu furanaayeen ay diiwaangeliyeen kiisas aad u yar oo caarruur ah oo uu ku dhacay, sidoo kale waxaa la mid ah Norwey iyo Trondheim, meelahaas oo aanu carruur ku haynay dugsiyada iyo xannaanooyinka carruurta.

- Haddii uu waalid/mas’uul qabo macaan ama neef, ilmaha ma gurigaa lagu haynayaa?
Dhakhtarka guud ee degmada Betty Pettersen: Haddii waalidku uu qabo macaan uu si fiican ula tacaalay ama neef aan cilladaysnayn looma baahna in ilmaha guriga lagu hayo. Waa in guriga iyo xannaanada carruurtaba la raaco talooyinka guud ee ka hortagga faafitaanka iyo nadaafadda wacan. Haddii uu waalidku ka weynyahay 50 sano, oo uu qabo cudur aanu si fiican ula tacaalin ama cudurkiisu u keenay cillado kale amase uu cuduro kale qabo, waxaa qumman in isagu/iyadu ay la xiriiraan dhakhtarkooda si loo qiimeeyo in loo baahanyahay in la diyaariyo deeq xannaanada carruurta ah. Waxaanu jecelnahay in dadku arrintaa kala xiriiraan xannaanada carruurta.

- Haddii uu qoysku qabo jirro sanbabada ah, ha ahaato ubadka ama dadka waaweyne, ma qummantahay in ilmaha guriga lagu hayo?

Dhakhtarka guud ee degmada Betty Pettersen: Jiradda sanbabadu waxay ka mid tahay jirrooyinka halis *sare ugu jiri kara* inuu fayraska covid-19 si khatar ah ugu qabto, gaar ahaan shaqaynta sanbabada oo ilaa xad hoos u dhac ku yimaado. Waa in kar hortagga faafitaanka guriga looga dadaalo xannaanada carruurtuna waxay arrintaas ka samayn doontaa waxqabad wanaagsan. Waalidka qaba jirro sanbabada ah waa inuu la xiriiro dhakhtarkiisa si loo qiimeeyo in loo baahanyahay in la diyaariyo deeq xannaanada carruurta ah si kolkaa reerka looga yareeyo halista qaaditaanka. Carruurta waalidkoodu (cid kaloo qoyska ka mid ah) ay halista u yihiin waa in la diyaariyo wadahadal u dhexeeya xannaanada carruurta iyo waalidka bal inay qabanqaabadaasi suuroobayso.

- Maxaa lagu kala saaraa calaamadaha infakshanka sanbabaka iyo <<småbarnsnese>> duuf dareerka carruurta yaryar?

Dhakhtarka guud ee degmada Betty Pettersen: Carruur badan ayaa sida qaalibka ah duuf ka dareeraa iyadoo aanu jirin infakshan sanbabka ahi, gaar ahaan kolka ay dibedda joogeen ka bacdi. Carruurta caynkaas ahi way imaankaraan xannaanada carruurta inta ay ka caafimaad qabaan. Haddii calaamadaha ilmaha ka muuqdaa ay isbeddelaan, oo la moodo inay tabar daranyihiin, xanuunsanayaan oo ay qandho leeyihiin waxaa looga shakiyaya inuu jiro infaskshan sanbabka ah oo baahsan.

- Xeerar caynkee ah oo ka hortagaya faafitanka ayaad uga fadhidaan inay xannaanada carruurtu ku dhaqanto?

Maamule Gunn Kristin Hansvold: Waxay shaqaalaha dhammaantood soo dhammaysteen koorso aasaasi ah oo ka hortagga faafitaanka ah. Warbixino wacan iyo aqoontooda oo kor loo qaaday ayaa saldhig u ah shaqaale la aammino. Shalay ayaa ka hortagga faafitaanka nalaga siiyey hagitaan wanaagsan. Halkan waxaanu si gaar ah ugu dadaalaynaa labo qodob: loo kaadinmaayo kolka ay carruurta iyo shaqaalaha lagu arko calaamadaha. Nadaafad wacan oo aanu had iyo jeer ka samayno xannaanada carruurta oo aanu ilaa xadka u danbeeya guntiga u xiranay. Iyo dhaqitaan wacan. Shaqaaluhu waa inay iyana ku xisaabtamaan inay hawsha dhiqitaanka wax ka fuliyaan. Waanu kala fogfogaanaynaa waxaanuna isu qaybinaynaa kooxo tiro yar oo joogto ah iyo shaqaale u joogto ah. Kooxahaas joogtada ah waa la oggolyahay in carruurtu ay isla dheelaan.

- Ma la samaynayaa xilliyo go'an oo keenitaan iyo kaxayn si loo yareeyo kulmitaanka?

Maamule Gunn Kristin Hansvold: Waxaanu faraha ku haynaa u kuurgelitaan baahida waalidiinta ee xilliyada aanu furannahay. Taas waxaanu ogaanaynaa kolka carruurtu badidoodu ay timaado, kolkaas ayaanu wax qorshaynaynaa. Wadashaqayn wacan ayaanu kooxaha waalidiinta la yeelanaynaa, si arrintan loo ssubiyo sida ugu fiican uu suuroobaysa.

- Sidee baad ugu talo gasheen inaad u yaraysaan khatarta in carruurta ugu yaryari aanay qaadin, kuwaasoo badanaaba isku waxlee cuna oo dhadhamiya, oo aan garanayn inay kala fogaadaan?

Maamule Gunn Kristin Hansvold: In aanu dejino qorshe wacan oo gudaha ah iyo in aanu si wacan ugu fikiro alaabta lagu ciyaaro ee aanu soo saarayno. Alaab lagu ciyaaro oo intii hore ka yar ayaanu soo saaraynaa, waana in aanu arrintaa si fiican uga warhayno oo u kontroolno. Si gaar ah ayaanu wixii nadaafadda khuseeya ula soconaynaa.

- Miya la yaraynayaa waqtiga ay xannaanada carruurtu furantahay?
Maamule Gunn Kristin Hansvold: Dadka qaar tani waa u suurtogal, laakiinse mar labaad waxaanu ku xiranahay u kuurgelitaanka iyo baahida waalidiinta.

- Ma haysataan dhaqaale/shaqaale idunku filan kolkaad isu qayb qaybinaysaan kooxo yaryar, oo qayb shaqaalaha ka mid ahina aanay shaqaynkarayn sabtoo ah waxay hoos imanayaan kooxaha halista ku jira iyo/ama ay calaamadihii leeyihiin?
Hoggaamiyaha degmada Ellen Ingdal: Tirada kooxaha ee talo-bixiyuhu tilmaamayaa waxay la midyihiin intii caadiga u ahaan jirtay shaqaalaha xannaanooyinka carruurta. Tani waxay baraatiko ahaan noo fududaynaysaa kooxo isu qaybinta. Haddii xannaanada carruurta ay shaqaale badani ka maqnaadaan, waa inaanu qiimayno bal in aanu kusimeyaal keeno. Caadi ayaan sidan loogu dhaqmaa haddii dad yaraani ka jirto xannaanada carruurta.

- Kalsooni maku qabi karaa in ilmahaygu aanu maalin walba la kulmayn wajiyo cusub oo dad waaweyn ah oo weli loo warhaynayo?
Hoggaamiyaha degmada Ellen Ingdal: Si buuxda taas kalsooni ugu qab.

- Ma jiraan waxyaalo ay waalidiintu soo siinayaan ama ay uu diidayaan inay carruurtoodu usoo qaataan xannaanada carruurta?
Maamule Gunn Kristin Hansvold: Ma rabno ciyaar la soo qaato. Dabcan waa la ogolyahay boonbolo xayawaan ah iyo beenbeenta la jaqo. Dharka weli waa loo dhigi karaa khaanadda dharka. Waxaanu u baahanahay waqti aanu warbxin fiican u samayno waalidiinta kooxaha. Waa muhim wadashaqayn wacan oo aanu la yeelano waalidiinta iyo mas'uuliyiinta.

- Carruurtu ma la ciyaarikaraan qofka ay rabaan?
Maamule Gunn Kristin Hansvold: Haa, kuwa ay isla joogaan ee ay isku kooxda yihiin.

- Sidee baa loo nadiifiyaa ciyaarta iyo meelaha dushooda iyo meeqa jeer?
Maamule Gunn Kristin Hansvold: Sidii hore si ka sii badan ayaanu wax u dhaqaynaa. Musqulaha iyo saxanka fool dhaqadka ugu yaraan hal mar ayaa maalin kasta la dhaqaa. Intaa waxaa dheer oo maalin kasta labo ilaa afar jeer la dhaqayaa meelaha dushooda. Qorshaha dhiqitaankayaga waanu adkaynaynaa.

- Ma jiraan shuruudo lagu xirayo kusimeyaasha? Kusimeyaal badan ayaa ka shaqeeya dhawr xannaanooyin iyo dugsiyo? Ma u madaxbanaan yihiin inay meelhaasoo dhan ka shaqeeyaan, kolka laga fekerayo cudur faafitaanka?
Hoggaamiyaha degmada Ellen Ingdal: Shaqaaluhu dhammaan waxay wada mareen waxbarasho sida looga hortago faafitaanka. Tani waxay kaloo khusaysaa kusimeyaasha. Hoggaamiyaha xannaanada carruurta ayaa u xilsaaran in arrintaa la hirgeliyo. Anagu ku talinmayno inay kusimeyaashu isaga dhex gooshaan dhawr xannaano, kollay sida ay xaaladdu iminka tahay.

- Haddii lagu taliyo in ilmahaygu guriga joogo, ma inaan kharashka booska xannaanada carruurta bixiyaa?
Agaasimaha degmada Camilla Trud Nereid: Haddii ilmuhu uu aadikaro xannaanada carruurta, sideedaba ujeeddadu waa inuu ilmuhu aado xannaanada oo kolkaa la bixiyo kharashka booska xannaanada carruurta. Haddii lagu taliyey in ilmaha guriga lagu hayo, kolkaa qof walba goonidiisaa loo eegaya.

- Degmadu ma waxay doorbidaysaa in qaarkayaga ay u sooroobayso aanu carruurta ku hayno guriga si ay u yaraato tirada carruurta ee joogaysa xannaanada carruurta, oo sidaasna ay ku yaraato khatarta faafitaanka cudurku?
Agaasimaha degmada Camilla Trud Nereid: Kolka laga fekerayo in carruurtu aanay wax sidaas u halis ugu ahayn inay qaadaan, iyo kolka aanu ka fekero wanaaga badan ee ay xannaanada carruurtu u leedahay carruurta, waxaanu ku talinaynaa in dhammaan carruurta awoodi kartaa, inay hadda yimaadaan xannaanada carruurta.

- Anigu kuma niyadsami furitaanka xannaanada carruurta. Waxaan akhristay daraasado cilmibaaris ah oo laga sameeyey covid-19. Dhawr daraasadood oo dalal dibedda ah laga sameeyey waxay sheegeen in carruurtu hubaal qaadi karto, laakiinse iyagu sida loo badinayo ay yihiin dadka aan calaamada laga arag. Meelaha ay carruuri joogtana waxa lagu yaqaanaa khatar weyn oo cudur fiditaan, sida tusaale ahaan dayrtii dhowayd lagu arkay dugsiga Flatåsen, halkaasoo ay boqolaal hal mar wada jirradeen, ama xannaanadii caadiga ahayd ee uu ka dillaacay norovirus. Ma ka fekerteen inaad tixgelisaan cilmigaa?
Dhakhtarka guud ee degmada Betty Pettersen: Degmada Trondheim waxay ku tiirsantahay qiimaynta iyo go'aanada ka yimaada agaasinka caafimaadka iyo sida ay sameeyeen hay'adaha kale ee dawladdu, iyo qiimaynta ay sameeyeen cilmibaarista caalamku iyo talooyinka laga helayo ilo caalami ah. Norwey waxaa jira carruur tiro yar oo lagu sheegay cudurka, ku dar oo waxaa tijaabo laga qaaday carruur tiro yar. Da' kasta oo carruuri jirto way qaadikaraan waana suurtogal in lagu arko calaamadihii oo ay dad kalena qaadsiin karaan. Waxaanu arrinta ku qotominaynaa qiimaynta dawladda iyo tan caalamiga ee la sameeyey waxayna nala tahay inay tahay qiimayn wacan.

- Maha ugu muhimsan oo ay tahay in aanu waalidiin ahaan iminka qaban karno ka hor intaan la furin xannaanada carruurta?
Dhakhtarka guud ee degmada Betty Pettersen: Waxay ila tahay waxaa ugu muhimsani waa in la wadaago farxad filashada iyo xagga wanaagga oo looga hadlo waxa dhicidoona. Inyar baan ku celinayaa ee faraha ha la dhaqdo. Waxaa kaloo iyana muhim ah in waalidiintu kalsooni yeeshaan oo na aaminaan, in aanu karaankayaga waxba ka reebanayn si khatarta lala xiriirinayo xannaanada carruurta ay weli ahaato tan ugu hoosaysa.

Xusuus! Waalidiinta iyo mas'uuliyiinta waxaa kaloo lagu boorinayaa inay la xiriiraan xannaanadooda carruurta haddii wax mugdi uga jiro.